# Macluumaadka Diiwaan Gelinta Xarunta Caafimaadka ku Saleysan Dugsiga

**2021-2022**

Gacaliye Waalidka,

Iyagoo kaashanaaya Portland, Dugsiyada Dadweynaha Westbrook iyo Koofurta Portland iyo Xarunta Caafimaadka Maine, Greater Portland Health waxay adeegyada Xarunta Caafimaadka ku Saleysan Dugsiga ka bixiyaan: Portland High School, Deering High School, Casco Bay High School, PATHS and King Middle School, Westbrook High School iyo South Portland High School.

Fadlan dhamaystir foomka caafimaadka ku lifaaqan si cunugaada loogu ogolaado adeegyada caafimaadka ku saleysan dugsiga ee ka jira dugsigooda. **Haddii cunugaada uu horay u haystay bixiyaha daryeelka aasaasiga ee caadiga ah ama bixiyaha caafimaadka dhimirka, waxaad weli ku qori kartaa Xarunta Caafimaadka ku Saleysan Dugsiga Greater Portland Healkth.** Ujeedadena waxay tahay in dhamaan caruurta iyo waalidiintooda lagu xero guriga daryeelka caafimaadka aasaasiga. Xarunta Caafimaadka ku Saleysan Dugsiga Greater Portland Health wuxuu dheeraad ku darra adeegyada bixiyaha daryeelka aasaasiga caadiga iyo wuxuu iyaga kala shaqeyaa iskuduwidda hadba sida ku habboon. Fadlan tag bogga internetka Greater Portland Health (http://www.greaterportlandhealth.org/) si aad u heshid macluumaad badan.

Sheegashooyinka ceymiska waxaa loo gudbin doonaa adeegyada la bixiyo hadba sida lagu dabaqi karo. Haddii bukaanka uusan qabin ceymis, Greater Portland Health wuxuu bixin doona hidmadda ku xiran dakhliga.

| **Xarunta Caafimaadka ku Saleysan Dugsiga ee Greater Portland Health waxaa laga helaa:** | **5ta sabab ugu sareyso in aad ku qortid cunugaada:** |
|---|---|
| • Adeegyada Caafimaadka Aasaasiga<br>• Adeegyada Caafimaadka Dabeecadda<br>• Adeegyada Cilmu Nafsiga<br>• Adeegyada Caafimaadka Ilkaha (Dental Health Services) (isku qorid gaar ah)<br>• Adeegyada Caafimaadka Telehealth | 1. Shaqaale ku wanaagsan daryeelka, soo dhaweynta<br>2. Ballamin degdeg ah oo kuu roon (lagaama rabo gaadiid)<br>3. Isku duwidda lala sameeyo bixiyaha daryeelka aasaasiga ee cunugaada<br>4. Dareyeel tayo iyo naxariis leh<br>5. Sida fudud ee loola socdo xaaladaha soo noqnoqdo |

**Warqadahaan waxaad ku arki doontaa:**

- Foomka Diiwaan Gelinta Caafimaadka - ***fadlan buuxi, saxiix, kaddibna ku soo celi xarunta caafimaadka ku saleysan-dugsiga ama kalkaalinta dugsiga. Fadlan dhamaystir xattaa haddii ilmahaaga lagu qoray sannadkii la soo dhaafay bacdamaa loo baahan yahay macluumaadkii ugu dambeyay.***
- Ogeysiiska Asturnaanta Caafimaadka Portland - wuxuu ku qoran yahay dusha warqaddaan - *waxaa loogu talogalay in aad adiga haysatid.*

- Su'aalaha Badanaa Leys Weydiiyo ee ku saabsan Xarumaha Caafimaadka ee ku Saleysan Dugsiga - *waxaa loogu talogalay in aad adiga haysatid.*
- *Haddii aad qabtid su'aalo dheeraad ah, fadlan la xariir Jason Goff, Maamulaha Hawsha Daryeelka Caafimaadka ku Saleysan Dugsiga (Practice Manager for School Based Healthcare), telefoonka (207) 874-2141 x 8402 ama jgoff@greaterportlandhealth.org*.

**Waxaad warqadaha cunugaada ka raadsataa foomka diiwaan gelinta ilkaha oo gaar ah.**

# OGEYSIISKA DHAQANKA MACLUUMAADKA CAAFIMAADKA

**Ogeysiiskaan wuxuu sharaxaa qiyaasta macluumaadka kugu saabsan adiga ee la isticmaali karo lana kashifi karo iyo sida aad ku heli kartid macluumaadkaan, fadlan si taxadir leh u fiiri.**

**Fahamka diiwaankaada caafimaadka/macluumaadka**
Marka aad soo booqatid Caafimaadka Portland, waxaa raad laga reebaa booqashada. Diiwaankaan waxaa ku jiri kara calaamadahaada, baaritaankaada iyo natiijadaha baarista, waxa bukaanka lagu sheego in uu qabo, iyo qorshaha daryeelkaada/adeegyada mustaqbalka. Macluumaadkaan lagu magacaabo diiwaanka caafimaadka/daweynta waa qeyb loo baahan yahay oo ku saabsan daryeelka caafimaadka/adeegyada aan adiga ku siino. Waxay u shaqeysaa sida:

- Aasaaska qorsheynta daryeelkaada iyo daweynta.
- Habka loola xariiro aqoonyaanada caafimaadka ee wax ku biiriyay daryeelkaada.
- Warqad sharci ah oo sharaxaad ka bixisa daryeelka/adeegyada aad qaadatid.
- Xaqiijinta dhinacyada saddaxaad ee lacagta bixiya (shirkadda ceymiska) in la bixiyay adeegyada.

**Xuquuqdaada la xariirta macluumaadkaada caafimaadka**
Inkastoo Greater Portland Health haayso diiwaankaada caafimaadka, adiga waxaad tahay qofka iska leh macluumaadka. Sida Hoos Timaado Sharciyada Asturnaanta Federalka (Federal Privacy Rules), waxaad xaq u leedahay in:

- Aad heshid ogeysiis ku saabsan isticmaalka iyo kashifaadda diiwaankaada caafimaadka/daweynta, kana mid ah koobiga warqadda ogeysiiska haddii la codsado.
- Aad codsatid in xayiraad la geliyo isticmaalka iyo kashifaadda macluumaadkaada caafimaadka, ama in aad codsatid in aan siyaabo kale kuugu soo dirno isgaarsiintaada qarsoon.
- Fattash kaddibna hel koobiga diiwaankaada.
- Codso in diiwaanka caafimaadkaada wax laga baddalo.

**Mas'uuliyadda na saaran**
Greater Portland Health waxaa laga rabaa:

- In ay xajjiso asturnaanta macluumaadka caafimaadkaada.
- In ay ku siiso ogeysiis ku saabsan waajibaadka sharciga iyo dhaqanka asturnaanta ay ku shaqeyso Greater Portland xagga macluumaadka caafimaadka aan kaa aruurino iyo kaa hayno adiga.
- In ay u hoggaansanto qodobada ogeysiiskaan
- In ay hesho ogolaashadaada ka hor inta aadan kashifin macluumaadkaada caafimaadka/daweynta.

Greater Portland Health waxay reebatay xaqa ay u leedahay in ay baddasho iyo in ay wax ka baddasho dhaqankeeda asturnaanta una hoggaansanto Sharciyada Federaalka iyo Gobolka. Haddii tani loo baahdo, imaashada xigta, bukaanka/macaamiisha waxaa la siin doonaa **Ogeysiiska Dhaqanka Macluumaadka Caafimaadka** oo cusub.

**Kashfaadyada la ogol yahay ogolaasho la'aan marka ujeedada tahay hor marrinta qaranka**
Greater Portland Health waxaa loo ogol yahay in ay isticmaasho iyo in ay kashifto macluumaadkaada caafimaadka iyadoo aan kaa haysanin ogolaasho marka:

- Uu rabo sharciga gobolka ama federaalka.
- Ku socoto madaxda, kana mid ah sarakiisha caafimaadka gobolka, Maamulka Raashinka iyo Daawada (Food and Drug Administration), hirgelinta sharciga, ururada helitaanka xubnaha jirka, baareyaasha caafimaadka, la xariira magta la siiyo shaqaalaha, marka la codsado si loo fulliyo hawlaha khaaska u ah dawladda, sida xaaladaha militariga ama la midka ah iyo wakaaladaha kale ee loo xil saaray ka hortagga ama kantaroolka cudurka.

**Qorshaha Daryeelka Caafimaadka Habeysan**
Greater Portland Health waxay xubin ka tahay Iskaashiga Daryeelka Bulshada Maine (CCPM, Community Care Partnership of Maine) , "Qorshaha Daryeelka Caafimaadka Habeysan" ee xoogga saara hagaajinta caafimaadka bulshadaha ay u adeegto. Xubnaha CCPM, oo kaashanaaya shirkadaha ceymiska, waxay adeegsadaan falanqeynta caafimaadka dadka, ku noqoshada isticmaalka,

qiimeynta tayada iyo hawlaha hagaajinta, iyo xiiladaha kale ee ku saleysan caddeynta si loo hagaajiyo daryeelka caafimaadkaada. Xubnaha waxay mas'uul ka yahiin caafimaadka dhamaan bukaanka ay u adeegto CCPM. Hay'adaha sameeya Qorshaha Daryeelka Caafimaadka Habeysan  waxaa ka mid ah xarumaha caafimaadka bulshada ee soo socda iyo isbitaalada. Cary Medical Center, DFD Russell Medical Center, Fish River Rural Health, Katahdin Valley Health Center, Mayo Regional Hospital, Millinocket Regional Hospital, Nasson Health Care, Pines Health Services, Penobscot Community Health Center, Greater Portland Health, Sebasticook Family Doctors, iyo St. Joseph Healthcare. Qorshaha Daryeelka Caafimaadka Habeysan ee CCPM wuxuu u ogolaadaa hay'adahaan hoos yimaada, kana mid ah Greater Portland Health, in ay qeybsadaan Macluumaadka Caafimaadka la Badbaadiyo hadba sida ay u baahdaan si ay u fulliyaan daweynta la ogol yahay, bixinta kharashka ama hawlaha daryeelka caafimaadka ee la xariira shaqada Qorshaha Daryeelka Caafimaadka Habeysan, haddii si kale uusan xaddidin sharciga, xeerka, ama qaanuunka. Waxaa la casriyeyn karaa liiska hay'adaha si wax looga dalbado hay'adaha cusub mustaqbalka. Waxaad liiska ugu dambeyay ka heli kartaa www.ccpmmaine.org/members ama wac 207-992-9200.

**<u>Si aad u heshid macluumaad badan, si aad u codsatid macluumaad ama si aad u soo sheegtid dhibaato</u>**

Haddii aad qabtid su'aalo, waxaad la xariiri kartaa Greater Portland Health, 180 Park Ave, Portland, ME 04102. (207) 874-2141. *www.greaterportlandhealth.org*. Haddii aad aaminsan tahay in la jebiyay xuquuqdaada asturnaanta, waxaad ashtako u soo gudbin kartaa Sarkaalka Asturnaanta iyo Ammaanka (Privacy and Safety Officer) adigoo ku soo dira cinwaanka kore, ama u soo dira Secretary of Health and Human Services, Washington, D.C. Ma jiri doonto aar gudasho haddii aad soo gudbisid ashtako.

**Diiwaan Gelinta Xarunta Caafimaadka Ku Saleysan Dugsiga Caafimaadka Greater Portland**

**Foomka Ruqsadda ee Isticmaalka iyo Kashifaadda Macluumaadka Daryeelka Caafimaadka**

**Marka aan hoos saxiixo hoos, waxaan qiraya oo oggolaanaya waxa soo socda, xagga diiwaan gelinta ilmahayaga Xarunta Caafimaadka Ku Saleysan Dugsiga Greater Portland ('Xarunta Caafimaadka Dugsiga GPH") iyo kashifaadda diiwaanka caafimaadka ilmahayga iyo macluumaadka la xariira.**

- Anigu waxaan helay oo akhristay Ogeysiiska Dhaqanka Macluumaadka Caafimaadka Xarunta Caafimaadka Dugsiga GPH ee kala talliya isticmaalka iyo kashifaadda lagu sameeyo macluumaadka caafimaadka ee ku jira diiwaankeyga caafimaadka ilmahayga, sida waafaqsan heerarka qarsoodiga HIPAA.

- Anigu waxaan u fasaxay Xarunta Caafimaadka Dugsiga GPH in uu galo diiwaanka caafimaadka Dugsiga ilmahayga, oo ey ku jirto balse aan ku ekayn diiwaanada jirka, dabeecadda, iyo la-tallinta haddii ay jirto, iyo macluumaad kasta oo la xariira, loona isticmaalo ujeedooyinka la xariira daaweynta ama sida uu rabo ama uu ogol yahay sharciga sida ay go'aan ku gaarto Xarunta Caafimaadka GPH.

- Anigu waxaan u fasaxay Xarunta Caafimaadka Dugsiga GPH in ay Dugsiga (kana mid ah kalkaalinta iyo shaqaalaha bulshada) siiso macluumaadka laga soo qaaday diiwaanada Xarunta caafimaadka Dugsiga GPH hadba sida loogu baahan yahay iyo sida ku habboon ujeedooyinka la xariira daaweynta ama sida loo baahan yahay ama sida sharcigu ogolyahay sida ay go'aan ku gaarto Greater Portland Health.

- Anigu waxaan u fasaxay Xarunta Caafimaadka Dugsiga GPH in ay macluumaadka ku jira diiwaanaada Xarunta Caafimaadka Dugsiga GPH (kana mid ah diiwaanada caafimaadka Dugsiga haddii uu ku jiro diiwaanka Xarunta Caafimaadka Dugsiga GPH) la qeybsato takhaatiirta kale ee ku hawlan daaweynta iyo bixiyeyaasha kana mid ah bixiyeyaasha daryeelka aasaasiga, takhatiirta ilkaha, iyo Xirfadlaha caafimaadka Dhimirka, in ay fududeyaan daryeelka caafimaadka ee la siiyo Ilmahayga.

- Anigu waxaan u fasaxay bixiyaha daryeelka ilmahayga, takhtarka ilkaha, iyo Xirfadlaha caafimaadka dhimirka ("Bixiyeyaasha Dhinaca Saddaxaad") in ay bixiyaan macluumaadka caafimaadka iyo diiwaanada siiyaan Xarunta Caafimaadka Dugsiga GPH si loo fududeeyo geynta daryeelka caafimaadka Xarunta Caafimaadka Dugsiga GPH ee la siiyo ilmahayga. Anigu waxaan fahamsanahay in ay dhici karto in Bixiyeyaasha Dhinaca Saddaxaad i weydiiyaan in aan siiyo ruqsad gaar ah si aan u ogolaado kashifaadda diiwaanada la xariira daaweynta ay fulliyaan Bixiyeyaasha Dhinaca Saddaxaad.

- Anigu waxaan u fasaxay Xarunta Caafimaadka Dugsiga GPH in uu sii daayo macluumaadka laga soo qaado diiwaanada Xarunta Caafimaadka Dugsiga GPH in loo baahan sii biilasha loogu dallaco ceymiska ama bixiyeyaasha kale.

- Anigu waxaan fahamsanahay oo aan oggolahay in: (i) Oggolaanshahaani shaqeyn doono muddo hal sanno laga bilaabo taariikhda saxiixa haddii aysan jirin muddo gaaban; iyo (ii) waxaan la noqon karaa ruqsaddaan waqti kasta marka la gudbiyo ogeysiis qoran oo ku saabsan la noqoshada ruqsadda; marka laga reebo marka Xarunta Caafimaadka Dugsiga GPH isku haleeyo ogolaashada asalka.

✍**Saxiixa Waalidka/Ilaaliyaha**: ________________________________ Taariikhda: _____________________

Daabac Magaca: ______________________________________________ Xariirka ka Dhexeeyo: _____________

GREATER PORTLAND HEALTH
CARING FOR THE WHOLE COMMUNITY

# Diiwaangelinta Xarunta Caafimaadka ee Dugsiga Ku-saleysan 2021-2022

## ** Fadlan buuxi oo u diir dugsiga **

Magaca Dugsiga:______________________________________________ Fasalka:____________

Magaca Ardayga:______________________________________________ Taariikhda Dhalashada:_____/_____/______ Jinsiga:_____
(la mid ah Kaarka MainCare haddi ay suurtagal tahay)

Cinwaan_______________________________________________ Summada Boostada:______________________ Hoylaawe ☐

Taleefonka Walidka:___________________________________ Fariin/Qoraal waayahay Haa/Maya

Cinwaanka iimaylka ee Caafimaadh fogaal araga (Telehealth)_____________________________________________________________

Magaca Caymiska________________ Aqoonsiga Heeshiska Caymiska#_________

Koox#_________________________ Cinwaanka Dalabka__________________

Damiinka/Magaca Walidka:____________________Taleefonka #____________

Lambarka Aqoonsiga MaineCare (wuxu ku dhammaada A) ___________________

**Miyaanad Caymis lahayn: Haa / Maya**

Haddii aadan caymis lahayn, mid ka mid ah la - taliyayaasheena kaalmada maaliyadeed ayaa kula soo xiriiri doona si uu kala hadlo caymiska iyo fursaddaha ujuurada ee kala duwan.

**Macluumaadka la xirrira Caafimaadka:**

Dhakhtarkaga/Bixiyaha Daryeelka Caafimaadka:___________________________

Ilmahayga waxa lo sameeyaya baadhitaan jidheed labadii sano ee u dambeeysay.

___Haa ___Maya ___Ma hubo

Ilmahaygu wuxuu u baahan doonaa tallaal sannadkan. ___Haa ___Maya __ Ma hubo

Ilmahaagu ma leeyahay xiiq? Haa/Maya

Qorshee Qoran oo Xiiqta ku aadan ma jira dugsiga? Haa Maya

Imahaagu ma qabaa sonkorow? Haa Maya

Qorshee Qoran oo sankorowga ku aadan ma jira dugsiga? Haa Maya

Dhibaatooyinka kale ee jirka, ilkaha, ama caafimaadka maskaxda:_____________

**Taariikhda Caafimaadka Qoyska/Naftaada -** Fadlan hubso inay soo martay taariikhda qoyskina mid ka mid ah xaaladaha caafimaad ee soo socda:

____**Xasaasiyadda** ____Sonkorow

____Cilladda difaaca jirka ____Xiiq

____Wadna xanuun ____Qaaxada

____Cudurka maskaxda

____Khamriga ama isticmaaka mukhaadaraadka

____Dhiig-kar

____Kolestaroolka aad u sareya

Jinsiyada Ilmaha ______ Cadaan ______ Madow, Afrikaan, Afrikaan Ameerika _____ Jasiirad kale oo Baasifik ah _____ Aasiyaan______

Koofurta/Bartamaha/Hindida Waqooyiga Ameerika, Dhaladka Alaska ______ Asal ahaan Hawaiian ______ Dhaqamo badan ka so jeeda____

Jinsiyada Ilmaha: ______ Isbaanish/Laatiin ______ Ma aha Hisbaanik/Laatiino

Wadarta dakhliga ee qoyska so gala sannadki:_____________________Tirada guud ee xubnaha qoyska ee ku nool guriga:______________

Magaca madaxa qoyska:________________________________________Xiriirka u lalle yahay ardayga:_____________________________

**Markaan saxiixo foomkan, waxaan qirayaa oo fahansanahay waxa so socda:**

- Waxaan helay oo aan akhriyey waraaqda Xarunta Caafimaadka Dugsiga Greater Portland Health ("GPH") ee ku aadan waaliidinta, kaas oo sharxaya waxa uu yahay Xarunta Caafimaadka Dugsiga ee GPH iyo adeegyada iyo faa'iidooyinka ay siin karaan ilmahayga.
- Xarunta Caafimaadka Dugsiga ee GPH waa qayb ka gooni ah dugsiga iyo xafiiska kalkaalisada dugsiga. Xarunta Caafimaadka Dugsiga ee GPH wuxuu bixiyaa qiimaynta ilkaha iyo noocyo kala duwan oo daaweyn iyo daryeel caafimaadeedka afka ah. Qeybtaas waxay ku dhex taal dugsiga, waxayna la xiiriirta bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka ee kale oo laga yaabo inay ku lug yeeshaan daryeelka ilmahayga.
- Ogolaanshahani wuxuu shaqaynayaa muddada ardaygu ka diiwaangashan yahay Nidaamka Dugsiga Portland ama ilaa lo beddelayo dugsi kale (yacni, laga bilaabo dugsiga dhexe ilaa dugsiga sare). Marka ardaygaygu ka gudbo dugsiga dhexe una gudbo dugsiga sare, waa inaan dib u qoro Xarunta Caafimaadka Dugsiga haddii aan la jeclaado inay sii wataan helitaanka adeegyada Xarunta Caafimaadka Dugsiga ee GPH.
- Waxaa la iga rabaa inaan dib-u-eego oo saxiixo Foomka Oggolaanshaha sii lo-Isticmaalo loona bixiyo Macluumaadka Daryeelka Caafimaadka ee la xiriira diiwaangelinta ilmahayga ee Xarunta Caafimaadka Dugsiga ee GPH.

**Waxaan si buuxda u akhriyey foomkan waxaanan oggolaaday inaan qoro ardaygayga Xarunta Caafimaadka Dugsiga GPH ee waqtigan.**

✍ **Saxiixa Waalidka/Masuulka:**_______________________________________________ Taariikh:______________________

Magaca oo farta waween ku Daabacan:___________________________________________ Xiriirka:______________________